

7

TALLAABOOYINKA XIGA KA-DIB BALLANTAADA

- Raac tilmaamaha adeeg bixiyahaaga
- Buuxi ama soo qaado daawooyin kastoo laguu soo qoray, oo u qaado sida lagu faray
- Qabso ballanta booqashada la-socoshada haddii aad mid u baahan tahay
- Dib-u-eeg sharaxaadaada ee dheefaha
- Bixi biilasha daawooyinkaaga
- Kala xiriir adeeg bixiyahaaga ama qorshahaaga caafimaadka su'aalo kasta

8

Go'aami haddii adeeg bixiyahaaga uu kugu habboon yahay

- Miyaad raaxo ku dareentay adeeg bixiyaha ee aad aragtay?
- Miyaad awooday in aad la hadasho oo aad fahamto adeeg bixiyahaaga?
- Miyaad dareemaysaa in adiga iyo adeeg bixiyahaaga aad wada gaari kartaan go'aamo wanaagsan?

DETOUR

XUSUUSNOW:

Wax dhib ah ma laha in loo beddesho adeeg bixiye kale!

WAHealthplanfinder.org



1-855-WAFINDER
1-855-923-4633



customersupport@wahbexchange.org



QORSHAHAD LAGU
GAARAYO

HEALTH



1

CAAFIMAADKAAGA KA HORMARI WAX KASTA

- Caafimaadqabka waa muhiim
- Joogtee hab-nololeed caafimaadqab leh
- Samee baaritaannada caafimaadka ee lagugu la taliyay oo maaree xaaladaha raaga
- Ku ilaali dhammaan macluumaadkaaga caafimaadka hal meel

YOU ARE HERE

2

FAHAMIDDA CAYMISKAAGA CAAFIMAADKA

- Eeg qorshahaaga caymiska si aad u aragto adeegyada la caymiyay
- Aqoon fiican u yeelo kharashaadkaaga (lacagaha joogtada ah ee caymiska, lacag-bixinnada caymiska ee la wadaago, Lacagaha caymiska laga jari karo, caymiska-la-wadaago)
- Ogow farqiga u dhaxeeya gudaha-shabakada iyo dibedda-shabakada

3

OGOW HALKA DARYEEL LAGA RAADSADO

- Ogow farqiga u dhaxeeya daryeelka aasaasiga ah iyo daryeelka xaalada deg-degga ah
- Daryeelka aasaasiga ah ayaa la doorbidaa marka aysan ahayn xaalad degdeg ah
- U adeegso qolka xaaladaha degdeggaa ah xaaladaha nafta halista geliya

4

HEL ADEEG BIXIYE

- Eeg liiska bixiyayaasha ee qorshahaaga
- Internet-ka ka baar
- Weyddii dad aad ku kalsoon tahay



5

BALLAN SAMEYSO

- Sheeg haddii aad tahay bukaan cusub
- Weyddii haddii ay qaataan caymiskaaga
- U sheeg magaca adeeg bixiyaha aad dooneyso in aad aragto iyo sababta aad u dooneyso ballanta

6

U-DIYAAR-GAROW BOOQASHADAADA

- Wado kaarkaaga caymiska
- Ogow taariikhda caafimaadka qoyskaaga
- Keen liiska daawooyin kasta ee aad qaadato
- Keen liiska su'aalaha laga wada hadlayo

QORSHAHADA
LAGU GAARAYO

HEALTH



KU SAABSAN WASHINGTON HEALTHPLANFINDER

1-855-WAFINDER

1-855-923-4633

Washington Healthplanfinder waa barta internet-ka ee loogu talagalay dadka iyo ganacsiyada yaryar si loo helo, la isku barbardhigo oo la isugu qoro qorshayaasha caymiska caafimaadka ee u-qalma.

WAPlanfinder



MACLUUMAADKA CAYMISKA OO DEGDEG AH
ADEEGSO APP-KA TELEFOONKA GACANTA SI AAD U
HESHO CAAWIMAAD QOF AHAAN AH OO KUU DHOW